

QORSHAHA KU NOQOSHADA DUGSIGA EE VICTORIA

Falalka Asaasiga ah	1: (Prep – 2) iyo ku noqoshada dugsiga ardada Dugsiyada Sarre	2: Ku noqoshada dhamaan ardada dugsiyada sarre, laba asbuuc ka dib	Ku noqoshada hawlihii caadiga ahaa ee dugsiga talada caafimaad ka dib
<ul style="list-style-type: none"> • Nadiifinta Ardada waxa laga caawimayaa hirgelinta nadiifin la xoojiyey, taas oo ay ka mid tahay nadiifinta maalinta oo dhan meelaha aadka loo qabsado ee musqulaha iyo handaraabka albaabada. • Kala-durugsanaanta bulshada Ardada waxaa laga caawin doonaa inay ilaaliyaan kala durugsanaanta bulshada, laakiin kala durugsanaanta bulsho lama tixgelinayo ardada isku goob wax ku baranaya. • Saxada Joogtaynta dhiqida gacanta ayaa lagu dhiirgelinayaa shaqaalaha iyo ardada iyo in, markaas saabuun la heli karin, la isticmaalo nadiifiyaha aalkolada ku salaysan. • Caafimaadka Qof kasta oo dareema fiyoobi la'aan maaha inuu yimaado dugsiga, sida shaqaalaha, ardada iyo waalidka. 	<p>(Prep – 2) iyo ardada dugsiga sarre (ardada 11 aad iyo 12aad)</p> <p>Ardada Bilawga ah ilaa heerka 2 aad iyo ardada sanada 11 iyo 12 naad waxay ku noqon doonaan goobta barashada markii ugu horraysay. Barnaamijka jira ee meel durugsan wax ku barashadu ma sii soconayso heerarkan waxbarasho.</p> <p>Heerka 3aad ilaa Ardada sanadka 10aad</p> <p>Ardada heerka 3 aad ilaa 10 naad oo guriga wax ku baran kara waxaa waajib inay guriga ku sii wataan. Ardadaan waxaa guriga ku sii bari doonaa dugsigooda.</p> <p>Ardada aan awoodin inay guriga wax ku bartaan waxay awoodaan inay dugsiga yimaadaan si ay uga galaan barnaamij la kormeerayo ee dugsigooda.</p> <p>Shaqaalaha dugsiga</p> <p>Inta lagu jiro Heerka 1aad dhamaan shaqaalaha dugsiga waxaa laga filayaa inay yimaadaan goobta waxbarashada.</p> <p>Shaqaalaha waxaa lagu kaalmayn doonaa Barnaamijka Caawimaada Shaqaalaha ee dugsiga.</p> <p>Waalidiinta</p> <p>Waalidintu waa inay raacaan talada dugsigooda wixii khuseeya nadaamka keenida iyo qaadista ilmaha.</p>	<p>Dhamaan ardaddu waa inay ku noqdaan goobta.</p> <p>Ardada heer walba ah ayaa ku noqon doona dugsiga.</p> <p>Xarakaadyada sida kaamamijka, dibad u bixida lama qabanayo ilaa la qaado xanibaada safar ee hadda lagu jiro.</p> <p>Dugsiyadu ma bixinayaan barnaamijka waxbarashada fog.</p> <p>Shaqaalaha dugsiga</p> <p>Dhamaan shaqaaluhu waxay imanayaan goobta.</p> <p>Shaqaaluhu waxay sii wadi doonaan helida kaalmada samaqabkooda oo uu siiyo Barnaamijka Shaqaalaha ee Caawimada dugsiga.</p> <p>Waalidiinta</p> <p>Waalidku waa inuu raaca talada dugsiga ee khusaysa qaadista iyo keenida ilmaha.</p>	<p>Hawlihi caadiga ahaa ee dugsiga sida cayaaraha, kaamamka, dibad u bixida ayaa la soo celinayaa marka la qaado xanibaadaha safarka.</p>

